

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha



جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومالية
مكتب رئيس الوزراء

(The Government of Federal Republic of Somalia)
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/ 0.823 08/2017

Taariikh: 18/08/2017

Ku: Taliyaha Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka Muqdisho:
Og: Rw/Kuxigeenka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho:
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho:

Ujeedo: Wareejin C/kariim Muuse Qalbidhagax.

Inagoo ilaalineyna nabad galyada Gobolka Geeska Afrika, xoojineeyna xiriirka walaaltinimo ee nagala dhaxeeya Dowladda Federaalka Itoobiya, iyo is fahamkii ka dhashay kulmadii booqasho ee madaxweynaha **3 Maajo 2017**, iyo booqashadii aan ku tagay **June 12, 2017** magaalada **Adis ababa** waxaan isku afgaranay in aan dib u soo nooleeyno kalsoonidii labada dowladood u dhaxeeysey.

Annagoo tixraaceyna kulamadaa kor ku taarikheeysan iyo isfagaradka labada doowladood, waxaan qaadeeynaa talaabo adag oo quseeysa amniga labada dal iyo xoojinta kalsoonida.

Hadaba inagoo dhowreyna danta iyo maslaxada labada dal waxaan ku farayaa in **C/kariim Muuse Qalbidhagax** oo ah muwaadin Itoobiyaan ah, dhibaaatana ku ah amniga labada dal, xiriir dhawna la leh kooxaha argagixisada, isla markaana gabbaad ka dhigtay Soomaaliya lagu wareejiyo Safiirka Dowladda Itoobiya u fadhiya Soomaaliya **Amb. Jamaaludiin Mustafa**, oo dowladiisa waklil uga ah fududeynta arintaan.

Fulin Wacan


Mudane: Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

